

XEER lr. 137 rep.

**MAAMULKA WASAAYADA TALYAANIGA EE SOMAALIYA
MAAMULUHU**

MARKUU ARKAY Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 Disember 1952, lr.2357;

MARKUU ARKAY amarka lr.5 ee taariikh 31 Maarso, 1952, oo isbeddel ku sameeyey sharciga 16 Febraayo 1913, lr. 89, oo ku saabsan Nidaamka Notaayada iyo Keydadka Notaayada;

MARKUU ARKAY xeerka lr. 43 ee taariikh 1 Abriil, 1952, taas oo lagu soo bandhigay tartan loo gelaayo hal jago notaaye ka hawlgala Somaaliya;

MARKUU GARWAAQSADAY in ka dib tanaasulka tartamaha kaliya, tartanka la soo sheegay wuxuu noqday mid la cidleeyey, sidaas darteedna loo baahan yahay in la soo bandhigo/iclaamiyo tartan kale, oo loo gelaayo magacaabidda hal notaaye oo ka hawlgala Somaaliya;

WUXUU SOO SAARAYAA AMARKAN

Qod. 1

Waxaa la iclaamiyey tartan loo shardinayo shahaado oo loo gelayo magacaabidda hal jajo oo ah notaayaha Somaaliya oo xarun ku leh Muqdisho.

Qod. 2

Si loogu oggolaado tartanka, musharixiintu waa inay buuxiyaan shuruudaha ku xusan qodobka 1 ee Amarka lr. 5 ee 31 Maarso 1952.

Qod. 3

Codsiga ka-qaybgalka tartanka, oo ku qoran warqad shabbadaysan Sh. 0,80, waa in loo geeyaan Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Somaaliya – Agaasinka Shaciyada iyo Arrimaha Garsoorka – muddo soddon maalmood ah gudahood oo ka bilaabata marka Amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ee Somaaliya.

Codsiga waa in ay ku qoran yihiin tilmaanta saxda ah, ee xirfadda uu hadda ku shaqaysto iyo degaanka caadiga ah, ee ka-dhursugaha tartanka, waana in ay la socdaan qoraallada soo socda:

- 1) nuqul dhan ee warqadda dhalashada;
- 2) caddeynta asluub wanaagga;
- 3) caddeynta jinsiyadda;
- 4) caddeynta dembi la'aanta;
- 5) caddeynta haysashada shahaaddo Jaamacadeed ee sharciga oo ay bixisay jaamacad awood u leh (la aqoonsan yahay);
- 6) qoraal muujinaya in uu soo maray tababar notaayadeed ama soo qabtay hawlo leh dabeecad notaayo;
- 7) caddeyn takhtareed oo sugaysa/caddeyneysa in jirkiisu dhisan yahay, ka maran yahay wax iin ah ee culus iyo cillado jirka ah oo ka dhigi kara mid aan u suubban fulinta hawlaha notaayada.

Qod. 4

Si loo sameeyo liiska kala-horreynta tartamayaasha oo isu dabayaan, sida ay u kala dhibco badan yihiin, waxaa la tixgelinayaa:

- 1) wixii hawlo notaayo ee horey loo soo qabtay ama hawlo leh dabecad notaayadeed oo horey loo soo qabtay;
- 2) u suubanaanta ama khibrada loo leeyahay hawlaha notaayada, marka loo eego dhibcaha uu tartamuhu heelay;
- 3) adeegyada laga fuliyey keydadka notaayadeed ama xafiisyada kale ee shabbaha notaayada;
- 4) ka-shaqaynta hawlo garsoor ee maamul;
- 5) ku-shaqaynta xirfadda qareen ama/iyo xeerilaaliye;
- 6) baridda maatooyin sharci;
- 7) shahaadooyinka uu haysto iyo qoraallada uu soo saaray tartamuhu;
- 8) dhibcaha ugu qoran shahaadada jaamacadeed.

Qod. 5

Guddiga ku xusan qodobka soo socda ayaa qaraar ka gaaraya ka-qaybgalka mid kasta oo ka mida ka-dhursugaha tartanka.

Qod. 6

Go'aanka ku saabsan shahaadooyinka tartamayaasha waxaa gaaraya Guddi ka kooban:

- Diplomaasi/La-taliye Dr. Pier Pasquale – Xoghaye Guud – Guddoomiye;
- La-taliye Maxkamad Racfaan – Dr. Fernando Cannavina – Agaasimaha Sharciga iyo Arrimaha Garsoorka – Xubin
- Garsoore Maxkamad Gobol – Dr. Domenico Raspini – Garsooraha Soomaaliya – Xubin.

Hawlaha Xoghayaha waxaa fulinaya Dr. Carlo Fettareppa Sandri, la-taliyaha Xukuumadda ee u – qaybsan Sharciga iyo Arrimaha Garsoorka.

Qod. 7

Guddiga imtixaan-qaadista, asaga oo ku saleynayo dhibcaha la siiyey tartame kasta, waxa uu sameynayaa liiska kala-horreynta guud, ee tartamayaasha, oo isu daba-yaal sida ay u kala dhibco badan yihiin.

Maamuluhu, marka uu aqoonsado nidaamsanaan hawlgallada tartanka, waxa uu xeer ku ansixinayaa liiska kala-horreynta ee tartanka.

Xeerka waxaa lagu shaacinayaa Faafinta Rasmiga ee Somaaliya.

Qod. 8

Shan iyo toban maalmood gudahood oo ka bilaabanta shaacinta xeerka ku xusan qodobka la soo dhaafay, ku-guuleystaha tartanka waa in uu oggolaanshihiisa gaarsiyo Agaasinka Sharciga iyo Arrimaha Garsoorka.

Haddii guuleysta laga waayo oggolaanshahaas, Maamuluhu waxa uu soo saarayaa xeer uu ku magacaabayo kan ku xiga, marka la eego liiska kala-horreynta, sidaas ayaana lagu wadayaa.

Muqdisho, 29 Oktoober 1954.

MAAMULHA
Martino

Waa Arkay waana Diiwaangeliyey – Diw. Lr.4 xaashi lr.194.
Muqdisho, 6 Nofember 1954.
Hantidhowraga: O TAM